

Wixii ka bilowda 14-ka disember waxaa lasoo saaray talo adag.

Laga bilaabo 14-ka disember waxaa jira "Talooyin qaran oo guud oo ad adag" Waxayna tahay in qof walba uu mas'uul ka yahay inuu hakiyo fidida cudurka (covid-19)

Dhamaan bulshada, hadey noqoto qof shakhsi ah, mid maamule goobeed ah, waxaa WAAJIB ku ah iney joojiyaan fidida cudurkan. Waa waajib qof walbana saaran.

Khaasatan markeynu ciideyno. Hada waxaa soo socda xilligii Kirismaska iyo sanadkii cusbaa. Oo dad badani jecelyihiin iney kulmaan. Laakiin waa muhiim in la yareeyo dadka lala kulmayo. Khatarta in cudurka covid-19 la qaado waa ay kordhaysaa, marka aad dad badan la kulantaba.

